



so

# *Faraha ja iska qaado iyo eurodac*

©Stockphoto / janp013

Warbixinta muwaadiniinta wadan sadexaad ama dadka  
aan waddan lahayn ee la xiray markii lala xiriiriay  
iyagoo xuduudaha u gudbaya si aan toosnayn, sida uu  
qabo qodabka 29(3) ee xeerka (eu) lambarkiisu yahay  
603/2013

Haddii aad tahay 14 sano jir iyo kawayn oo markaa laguu xidhay inaad si aan caadi ahayn u goynaysay xuduudda, faraha ayaa lagaa qaadi doonaa waxaana loo gudbin doonaa kaydka xogta faraha ee la dhaho "Eurodac" habkan waa inaad wada shaqayn ka gaysataa – sharciga ayaa kugu waajib yeelay in faraha lagaa sawiro.

Haddii farahaagu ay si cad u muuqan waayaan, oo ay ku jirto inaad si kas ah farahaaga dhaawac u gaarsiisay si aysan usoo bixin, mustaqbalka ayaa faraha lagaa qaadi doonaa.

Haddii aad markale mustaqbalka meel kale ka dalbato magangalyo markale ayaa faraha lagaa qaadi doonaa. Haddii aad magangalyo ka dalbato wadan ka duwan kan markii hore faraha lagaaga qaaday, waxaa dib laguugu celin karaa wadankii faraha lagaaga qaaday.

Xogta farahaaga waxaa la kaydin doonaa 18 bilood – 18 bilood kadib, si otamaatig ah ayaa looga tirtiri doonaa kaydka xogta. Sawirka farahaaga oo kaliya iyo jinsigaaga ayaa waxaa lagu kaydin doonaa Eurodac – magacaaga, sawirkaaga, taariikhdaada dhalasho iyo asalkaaga looma diri doono kaydka xogta ama lama kaydin doono.

Waxaad wakhti kasta mustaqbalka codsan kartaa inaad hesho warbixinta xogta adiga kula xiriirta ee lagu kaydiyay Eurodac oo aad ka hesho wadanka faraha kaa qaaday. Waxed wadyiisan kartaa in xogtaas la saxo ama la masaxo – waa in la tirtiraa, tusaale ahaan, haddii aad muwaadin ka noqoto EU ama wadan la xiriira ama haddii aad ka hesho ogalaansho daganaansho mid ka mid ah wadamadan oo aadan magangalyo ka dalban.

Eurodac waxaa ku shaqeeya Haayadda Midowga Yurub ee la dhaho eu-LISA. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedooyinka uu sharcigu qeexay. Waxaa xogtaada heli kara oo kaliya Sistamka Dhexe ee Eurodac. Haddii aad mustaqbalka magangalyo ka codsato wadan kale oo EU la xiriira<sup>1)</sup>, farahaaga waxaa loo diri doonaa wadankaas si loo xaqijiyo. Xogta lagu kaydiyo Eurodac lalama wadaagi doono wadan kale ama urur ka baxsan EU iyo wadamada la xiriira.

1) Xogta farahaaga waxaa lala wadaagi karaa cidda uu sharcigu u ogalaado ee u dhexaysa 27ka wadan ee Wadamada Xubnaha ka ah EU oo lagu daray 4ta Wadan ee La Xiriirta – Noorwey, Ayslaandhi, Iswiislarlaandhi, iyo Lijtenistiin.

Marka la gaaro 20ka Julaay 2015, farahaaga waxaa baadhi kara maamulada sida booliska iyo xafiiska booliska Yurub (Europol) kuwaas oo codsan kara inay galaangal u yeeshaan kaydka xogta Eurodac iyada oo ay ujeedadu tahay ka hortagidda, dareemidda iyo baadhista danbiyada khatarta ah iyo argagixisada.

## Warbixinta xiriirada

### Diiwaanhayaha Eurodac iyo wakiilkiisa

Meelaha lagala xiriiri karo:  
Maamulka booliska (Poliisihallitus)  
iyo Hoggaanka socdaalka  
(Maahanmuuttorvasto)

### Halka lagala soo xiriiri karo xafiisyada diiwaanhayaha

Poliisihallitus (Maamulka booliska)  
PL 1000 (Vuorimiehentie 3),  
02151 Espoo  
tel: +358 295 480 181  
kirjaamo.poliisihallitus@poliisi.fi

Maahanmuuttorvasto  
(Hoggaanka socdaalka)  
PL 10, 00086 Maahanmuuttorvasto  
tel: +358 295 430 431  
(xiriirinta telefoonada)  
migri@migri.fi www.migri.fi

Haddii aad doonayso inaad aragto macluumaadka adiga kugu saabsan ee lagu qoray nidaamka Eurodac,

waxaad si shakhsiyah ah codsi ugu gudbisaa booliska. U diyaargaroow inaad caddayso aqoonsigaaga shakhsiyadeed. Waxedaan kuu soo jeedinaynnaa inaad la xiriirto xafiiska booliska ee kaa qaaday codsigaaga magangalyada. Meelaha aad kala xiriiri kartid xafisiyada booliska waxaad ke heleysaa bogga internetka ee booliska, poliisi.fi.

### Halka lagala xiriiri karo hay'adda ilaalinta xogta qaranka

Tietosuojavaltuutetun toimisto (Xafiiska wakiilka ilaalinta xogta)  
Cinwaanka la tago:  
Lintulahdenkuja 4, 00530 Helsinki  
Cinwaanka boostada:  
PL 800, 00531 Helsinki  
Xiriirnta telefoonada:  
+358 29 566 6700  
Telefoonka talsosiinta guud ee qofka shakhsiga ah: +358 29 566 6777  
talaada-khamiis, saacadda 9.00-11.00  
tietosuoja@om.fi www.tietosuoja.fi

©Midowga Yurub 2014

Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.



Rajavartiolaitos  
Gränsbevakningsväsendet  
The Finnish Border Guard